



**Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya  
Wasaaradda Warfaafinta, Dhaqanka iyo Dalxiiska  
Xafiiska Wasiirka**

**Warsaxaaafadeed**

**02/11/2016**

Maanta 02 November 2016 uu ku beegan maalinta caalamiga ah ee la dagaalanka la noolaanshaha dembi laga galay weriyayaasha (International Impunity day) waxay Dawladda Soomaaliya la wadaagaysaa weriyayaasha Soomaaliyeed (both Public and Private Media workers) dareenkooda rajadda iyo cabsida leh, iyo tacida ay u dirayaan weriyayaashii ay dileen ama dhaawaceen kooxaha argagixisadda ah ee ka hawl gala Soomaaliya.

Soomaaliya oo ka mid ah meelaha ugu qatarta badan ee weriye ka hawlgalo laguna dilay weriyayaal aad u fara badan ilaa intii ay ka soo baxeen kooxaha argagixisadda ahi, waxay maanta ku socotaa dariiq wanaagsan oo ay dib u dhismeen hay'adihii dawliga ahaa oo ay ku jiraan hay'adaha amniga, Dawladda iyo weriyayaashuna rajo weyn ka qabaan in si dhaqso ah ay u joogsan doonaan dilalka iyo handadaadda ay kooxaha argagixisada ahi ku hayaan weriyayaasha Soomaaliyeed.

Soomaaliya oo ah dalka ka soo kabanaya burbur dawladeed, amni, bulsho iyo system wuxuu maanta leeyahay Warbaahinta ugu balaadhan geeska Africa iyo Dastuur, sharci Warbaahineed iyo siyaasad dawladeed oo dhamaantood xafidaya xornimadda hadal, kulanka iyo fikir, taasoo loo xilsaaray Wasaaradda Warfaafinta iyo hay'adaha sharciga in ay hirgelinayaan.

Guud ahaan Dawladda Soomaaliya, Wasaaradda Warfaafinta iyo madaxda hay'adaha amnigu waxay ku baraarugsan yihiin sida ugu dhaqsaha badan loo sixi doonaan khaladaadka yaryar iyo isku dhacyada ay weriyayaashu mararka qaarkooda kala kulmaan hay'adaha amniga ee heer Federaal ama Dawlad goboleed, taasoo ay sabab u tahay dareenka adag ee ay hay'adaha amnigu kala horjeedaan argagixisada, ama tababar iyo aqoon la'aan dhinaca sharciga ah.

Dawladda Soomaaliya waxay ku hawlan tahay in ay sharciga hor keento cid kasta oo tacadi u geysata weriyayaasha ka hawlgala Jamhuuriyadda Soomaaliya sidi ay horeba ugu guuleysatey in ay baabi'iso, soo qabqabato ka dibna la ciqaabo shabakado argagixiso oo u xilsaaran dilista iyo u cagajuglaynta Warbaahinta iyo weriyayaasha Soomaaliyeed.

Ugu dambeyn, waxaanu mar labaad tacsi u direynaa qoysaskii iyo caruurtii ay ka teegen weriyayaashii la diley iyagoo aan waxba galabsan ee guud ahaan caalamka oo dhan iyo gaar ahaan Soomaaliya

Dhamaad

